

1

Akhri bayaannada ku jira lifaaqan ee ku saabsan tartannada aad ka codeynayso.



2

Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga adigoo isticmaalaaya qalin midab kasta ah.



3

Saxiix bakhshaddaada. Saxiixaagu waa inuu u dhigmo saxiixa aan ku hayno diiwaankaaga diiwaan gelinta codbixiyaha si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.



4

Warqaddaada codbixinta wakhti hore soo celi. Haddii aad isticmaalayso sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codeey!



5

Ka raad-raac warqaddaada codbixinta halka [kce.wiki/TrackMyBallot](https://www.kingcounty.gov/elections/obmp). Waa sida ugu dhaqsaha badan ee aad ku ogaan karto in warqaddaada codbixinta la tiriya, codkaagana la maqlay.



Sida loo

codeeyo!


Doorashada Gaarka ee Febraayo 2025

Degmada King Buug-yaraha Codbixiyeyaasha Deegaanka ee Rasmiga ah

sida ay codsadeen Magaalada Burien

Saxiix si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor halka [kce.wiki/TrackMyBallot](https://www.kce.wiki/TrackMyBallot).



Is diiwaan geli si aad u codeyso



**Oonleenka:** Booqo [VoteWA.gov](https://www.vote.wa.gov) si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 3.



**Boostada:** Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta halka [kce.wiki/VoterReg](https://www.kce.wiki/VoterReg) oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 3.



**Shakhsi ahaan:** Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa halka xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 11, Maalinta Doorashada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa halka [kingcounty.gov/elections](https://www.kingcounty.gov/elections).

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Barro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, xarumaha codbixinta, iyo in ka badan!




Waxaan halkaan u joogaa in aan caawino!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawini kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma rabtaa inaad si gaar ah u calaamadayso warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta [kingcounty.gov/elections/obmp](https://www.kingcounty.gov/elections/obmp) si aad uga faa'iidayato Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta waxaa ku duuban macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta, helitaanka caawinaadda, iyo wax dheeraad ah. Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka eegto:

- Shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow
- Halkee laga heli karaa caawinaad shakhsi ahaanneed
- Sida loo daabaco warqaddaada codbixinta haddii taada lunto ama burburto.



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa mid beddelaad ah adigoo isticmaalaaya Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (Online Ballot Marking Program, OBMP). Icticmaalka OBMP, waxaad ku heli kartaa oo aad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

OBMP waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa indhooleyaasha ah ama uu aragoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadayaan. Waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan.



Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka [kingcounty.gov/elections/obmp](https://www.kingcounty.gov/elections/obmp).
- Macluumaadkaaga geli foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama adoo soo marsiinaaya boostada.

AMA

- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.



Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan la xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).



Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqeyaasha musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

[www.pdc.wa.gov](http://www.pdc.wa.gov) | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828

206-296-VOTE (8683)

[elections@kingcounty.gov](mailto:elections@kingcounty.gov)
[kingcounty.gov/elections](https://www.kingcounty.gov/elections)

Baraheena Bulshada

[@kcelections](https://www.kcelections.org)


**Cabbirka Hindisaha Lr. 1**

Cabbirka Hindisaha ee Magaalada Burien Lr. 1 ayaa wuxuu khuseeyaa heerarka shaqada ee loo-shaqeeyayaasha Burien.

Cabbirkan ayaa wuxuu u baahnaan doonaa in loo-shaqeeyayaasha waaweyn, sida la qeexay, ay shaqaalaha siiyaan mushaharka ugu hooseeyaa ee saacaddii oo lagu salaynaayo waxa looga baahan yahay loo-shaqeeyayaasha magaalada Tukwila, oo ay la socoto muddooyin marxalad loogu soo daraayo loo-shaqeeyayaasha yaryar, laguna hagaajinaayo sicir-bararka sannad walba. Loo-shaqeeyayaasha qaarkood waa inay shaqaalaha hore u jiray siiyaan saacado shaqo oo dheeraad ah ka hor intaysan shaqaaleysiin shaqaale cusub ama qandaraasleyaal hoose. Xeerka la soo jeediyay ayaa shaqaalaha ka ilaalinaya aargoosiga, wuxuu abuurayaa xallino iyo ganaaxyo ku aaddan xadgudubka.

Ma tahay in Xeerkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*



Waxaad u codeynaysaa **Haa ama Maya** si aad Cabbirka Hindisaha Lr. 1 ugu hirgeliso sharci ahaan

*Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (RCW 35A.11.100 iyo 35.17.240)*

**Bayaanka sharaxaadda**

Cabbirkan wuxuu hirgelinayaa xeer u baahan in loo-shaqeeyayaasha hoos yimaada xukunka xeerkan ay (1) bixiyaan mushaharka ugu hooseeya dhammaan saacadaha laga shaqeeyay gudaha Burien, iyo (2) in shaqaalaha shaqeeya wakhtiga dhimman ay siiyaan saacado dheeraad ka hor inta aanay shaqaaleyn shaqaale cusub, qandaraasleyaal, ama shaqaale ku meel gaar ah haddii shaqaalaha shaqeeya wakhtiga dhimman ee horey u jiray ay leeyihiin xirfado iyo khibrad ay ku fuliyaan shaqada.

Mushaharka ugu hooseeya oo dhaqan galaaya 30 maalmood ka dib ansixinta waxay la mid noqon doontaa tan Magaalada Tukwila ee loo-shaqeeyayaasha waaweyn, ka dibna lagu hagaajinaayo sicir-bararka sannad walba, iyadoo ay la socoto muddooyin marxalad loogu soo daraayo loo-shaqeeyayaasha yaryar. Mushaharka ugu hooseeya ee loo-shaqeeyayaasha cabbir ahaan dhex-dhexaadka ah ayaa ka bilaabi doona in ka hooseysa \$2, iyadoo dhimmista ay hoos u dhacayso \$1 sannadkii. Mushaharka ugu hooseeya ee loo-shaqeeyayaasha cabbir ahaan yaryar ayaa ka bilaabi doona in ka hooseysa \$3, iyadoo dhimmista ay hoos u dhacayso \$0.50 sannadkii. Muddooyinka marxaladda ka dib, dhammaan loo-shaqeeyayaasha waa inay bixiyaan mushaharka ugu hooseeya ee buuxa.

Loo-shaqeeyayaasha kama aargoosan karaan shaqaalaha fulinaaya xuquuqaha hoos yimaada xeerka waana inay u hoggaansamaan shuruudaha maamulka.

Xallinnada waxaa ka mid ah bixinta: kharashka qareenka, mushaharka aan la bixin, dulsaarka, magdhowga la bixiyay oo u dhigma laba jeer mushaharka aan la bixin, magdhowga dhaawacyada, iyo \$5000 oo ganaax aargoosi ah. Xadgudubyada ula kaca ah waxay loo-shaqeeyayaasha u keenni karaan in lagala noqdo shatiga ganacsiga.

Xeerka mushaharka ugu hooseeya ee hore jira ee ku qoran Sharciga Dowladda Hoose ee Burien ayaa kaga duwan dhinacyo kala duwan oo ay ku jiraan qaybaha loo-shaqeeyaha, darajada shaqaalaha, xisaabinta mushaharka ugu hooseeya, qadarinta bakh-shiishka, xallinta, iyo sharciyo kale.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

**Heather Dumlao**  
Karaaniga Magaalada  
(206) 248-5517  
cityclerk@burienwa.gov

**Bayaanka lagu taageerayo**

Jennifer Fichamba, Stephen Lamphear, Kelsey Vanhee  
RaiseTheWageBurien.org

Mushaharaadka Burien ayaa hoos uga dhacay qiimaha nolasha. Qofka shaqeeya wakhtiga buuxa waa inuu qaataa in ka badan \$30/saacaddii si uu awood ugu helo guri hal qol ah. Dadka ka shaqeeya Burien waa in ay halkan ku noolaan karaan, mana aha in qof shaqeeya wakhti buuxa uu ku noolaado faqri.

Cabbirkan waxa uu kor u qaadayaa mushaharka ugu hooseeya ee Burien si uu ugu dhigmo kuwa Tukwila, Renton, White Centre, SeaTac, iyo Seattle ee noo dhow. Tani waxay Burien ka dhigi doontaa mid tartan leh halkii ay ka cayrin lahayd shaqaalaha si ay lacag badan uga sameeyaan isla shaqadii magaalada deriska nala ah. Ku codee *Haa* si Burien loo siiyo kordhin mushahar!

U Ololeeyayaasha ganacsiga ayaa ajeendahooda ku riixay Golaha Magaalada Burien si ay isugu dayaan in ay jabiyaan cabbirkan. Waxay ansixiyeen xeer iska dhigaaya inuu kordhinayo mushaharaadka laakiin dhab ahaantii wuxuu meesha ka saarayaa shaqaalaha badankood. Qof kasta oo hela bakh-shiishka ama dheefaha, xitaa dadka qaar ee u shaqeeya shirkadaha caalamiga ah, uma qalmi doonaan kordhinta mushaharka. Waa xasarad ay taageerayso ganacsi si mushaharaadka loogu hayo mid hoose.

Cilmi baarista ayaa waxay muujinaysaa in kororka mushaharka ugu hooseeya ee deegaanka ay dhab ahaantii abuuraan shaqooyin, oo ay ku jiraan shaqooyinka ganacsiga yaryar. Mushaharaadka shaqaalaha qaata mushahar ka sareeya mushaharka ugu hooseeya ayaa sidoo kale kordhi doonta marka loo-shaqeeyayaasha ay doonayaan inay sii haystaan xirfadaha iyo waayo aragnimada shaqaalahaas. Marka dad badan ay haystaan lacag badan, taasi waxay u fiican tahay dhaqaalaha deegaanka. Ku codee *Haa* si aad Burien u siiso mushahar kordhin!

**Beeninta bayaanka looga soo horjeedo**

*Ku Codee Haa* soo jeedinta keliya ee siin doonta *dhammaan* shaqaalaha Burien mushaharka ugu hooseeyaa oo ah mid caddaaladda ah (\$20.21 ee loo-shaqeeyayaasha waaweyn) iyo shaqaalaha shaqeeya wakhtiga dhimman taasi oo ah dariiq caddaalad ah oo loo maro shaqo wakhti-buuxa ah. Hindisaha waxaa taageeraya shaqaalaha iyo ururada, oo ay ku jiraan UFCW, Ururka Waxbarashada ee Highline, iyo Ururka Shaqaalaha MLK. Ha rumaysan beenta mucaaradka ee ku saabsan luminta xakamaynta ama sharciga hadda jira inuu yahay mid ku filan – waxaa ka buuxa daldaloollo. *Ku Codee Haa* si shaqaalaha Burien loo siiyo mushahar kordhinta loo baahan yahay. RaiseTheWageBurien.org

**Bayaanka looga soo horjeedo**

Eric Papczun  
VoteNoForBurien.com

Ku codee “Maya” in codbixiyayaasha Tukwila la siiyo xakamaynta mushaharaadka deegaankeena. Si sax ah ayaa taas u akhrisay: hindisahan, oo ay abuureen koox ka baxsan Burien—Transit Riders Union (Ururka Fuuleyaasha Gaadiidka Dadweynaha)—waxay go'aannada xakamaynta mushaharka ka qaadi doonaan dadka ku nool kana shaqeeya Burien, ayagoo nagu xiraayo magaalo caan ku ah moolalka waaweyn, dukaamada tafaariiqda waaweyn, iyo ganacsiyada shirkadaha. Miyaysan ku kalsoonayn adiga iyo hoggaamiyayaasheena magaalada ee lasoo doortay inay sameeyaan waxa ku habboon Burien?

Laga bilaabo Janaayo 1, Burien ayaa hore u leh midda ugu sareysa ee mushaharaadka ugu hooseeya ee dalka—\$20.16 ilaa \$21.16 ee ganacsiyada waaweyn. Sharcigaan waxa lagu qaabeeyay talo ka timid shaqaalaha, ganacsiyada yaryar, iyo kooxaha shaqaalaha, iyada oo la hubinaayo mushahar sare oona la ilaalinayo makhaayadaha ay leeyihiin soogalootiga iyo dukaamada qoysku maamulaan ee ka dhigaaya magaaladeena mid gaar ah. Sababtoo ah waa siyaasaddeena, waan hagaajin karnaa hadba sida loo baahdo.

Haddii hindisahan la ansixiyo, Burien ayaa waaynaysa xakamaynta siyaasaddeeda mushaharka. Ma cadda sida aan u soo ceshan lahayn.

Ku codee “Maya” si mustaqbalka Burien aan gacmaheena ugu haysano. Ku codee “Maya” si loo ilaaliyo siyaasad aan sifayn karno, intii aan iska wareejin lahayn xakamaynta deegaanka oo aan waxyeello u geysan lahayn ganacsiyada yaryar iyo shaqaalaha ee qeexa bulshadeena. Ku codee “Maya” si aad u ilaaliso xaqa ay Burien u leedahay inay doorato waxa u wanaagsan Burien.

**Beeninta bayaanka lagu taageerayo**

Bartamaha Magaalada Burien ayaa ah ganacsiyo yaryar oo isku xiran oo firfircoon oo ka badbaadaya dakhli faa'iido aad u yar. Ku xiritaanka mushaharka ugu hooseeya ee Burien midka ganacsiyada waaweyn ee Tukwila waxay halis gelinaysaa dukaamada deegaanka, makhaayadaha, iyo shaqooyinka ay bixiyaan. Waa inaan taageeranaa shaqaalaha anagoo ilaalinayna ganacsiyada ka dhiga kuwa waara. Intaa waxaa dheer, shaqaalaha da'da yar waxay u baahan yihiin fursado ay ku bilaabaan mushaharka heerka gelitaanka shaqada oo ay kasbadaan mushahar kordhin markay khibrad helaan. Maya ugu Codee siyaasadda mushaharka ee ah hal cabbir oo ku habboon dhammaan oo ay soo rogeen kuwa Seattle iyo Tukwila ee wata danaha gaarka ah.